

Caafimaadka Bulshada ee Waqooyiga (North) Richmond

Waxaa hada la dhameystiray dayactirkii wadooyinka ay dadka ku lugeeyaan iyo dhirta ku hareereysan si ay bulshadu si sahlan ugu dhex socoto.

Dib-u-meelaynta Richmond


In ka badan 40% dadka kirada hada bixiya waxa loo sameeyey dib-u-dejin iyadoo dadkaas qaar bilaabaya inay u guuraan guryaha cusub ee ku yaal Elizabeth Street.

Wali waxaan caawinaynaa dadka haray si ay u guuraan ugu dambeyn dhamaadka Febraayo 2026.



Jadwalka dib-u-dejinta

139 Highett Street iyo meesha kor loogu socdo ee Elizabeth Street, Williams iyo Anderson Courts



Nagu xirnoow



Kulamada
la isku xog
wareysanayo



Ra'yigii nalogula
wadaagay
kulamadii
wadatashiga




Isdiiwaangeli
si aad ula
socoto wixii soo
kordha

Si aad wax kasta ula socoto booqo:



homes.vic.gov.au/richmond-precinct



nagala soco baraha
bulshada raadi
Homes Victoria

Waxa ka socda goobta

Gurigii u dambeeyay ee ku yaal xaafada Belgium Avenue Suuqa Twilight ee 2025

Nagala soo qeybgal dabaaldaga xagaaga

Taageerada loogu talagalay dadka kirada ugu jira guryaha ee dib-u-dejinta loo sameynayo

Dib u dejinta Richmond ayaa sidii loo qorsheeyay ku socota si loo dhameystiro bisha Febraayo ee 2026

Casriyeynta amniga ayaa wali socota

Kaamirooyinka amniga oo la casriyeeyay ayaa hadda shaqeynaya horumaro kalena waa ay soo socdaan

dabaaldaga xagaaga suuqa Twilight

**3:30-5:30pm 8-da Diseembar
106 Elizabeth Street**

Waxaa taageeray golaha deegaanka ee Yarra



Kiraystayaasha ayaa hada dib-u-dejin loo sameynaya

139 Highett Street iyo meelaha kor loogu soconayo ee Elizabeth Street iyo Williams iyo Anderson Courts



Taageerada loogu talagalay dadka kirada ugu jira guryaha ee dib-u-dejinta loo sameynayo

9-ka subaxnimo ilaa 5-ta galabnimo Talaadooyinka, Arbacooyinka iyo Khamiis kasta
112 Elizabeth Street

10-ka subaxnimo ilaa 4-ta galabnimo Isniinta ilaa Jimcaha
Xarunta Bulshada ee Waqooyiga Richmond ee ku taal 110 Elizabeth Street



106, 108, iyo 110 Elizabeth Street

Dib u dhiska mustaqbalka

Xariijimaha baarkinada baabuurta ayaa la wadaa



110 Elizabeth Street

Nagu soo booqo xarunta bulshada si aad caawimaad ugu hesho biilasha korontada

10-ka subaxnimo ilaa 4-ta galabnimo, Isniinta, 24ka ilaa Khamiista 27da Nofeembar



112 Elizabeth Street

Dib u dhiska mustaqbalka



Mukeyfyada la rakibayo waxaa marka hore lagu bilaabi doonaa guryaha mudnaanta la siinayo



Agagaarka xaafada

Casriyeynta amniga ayaa wali socota

- Kaamirooyinka amniga ayaa la casriyeeyay si ay wax badan u qabtaan
- Diyaarinta fureyaalka goobta lagu galo oo la casriyeeyay horaanta sanadka soo socda

Waxaa laga yaabaa inaad aragto:

- Qaar ka mid ah shaqaalaha ayaa goobta ku sugnaan doona sidoo kalena waxaa jiri doona shanqadh yar maadaama mukeyfyo lagu xirayo guryaha qaar
- Baabuurta xamuulka qaada oo alaabaha aan loo baahnayn ayaa saaraya guryihii bannaanaa
- Xoogaa shanqadh ah inta guryaha banaan baaritaan lagu sameynayo lana sugayo
- Baabuurta caasiyada ah ee lagu guuro ayaa la dhigayaa wadooyinka Elizabeth Street iyo Lewis Court iyadoo dadka guryaha degani ay u guurayaan guryo cusub
- Hawlaha nadiifinta iyadoona mashiino yar-yar ay ooli doonaan xeyndaabka gadaasheeda

Wax howlo shaqo oo wax dumis ah ma dhici doonaan inta dhismayaalka la degan yahay.



Shaqada aan qabaneyno waxaa lagu hagaya saacadaha shaqada caadiga ah ee golahaaga:

Isniin ilaa Jimca inta u dhaxaysa 7-da subaxnimo iyo 6-da fiidnimo

Sabti inta u dhaxaysa 9-ka subaxnimo iyo 3-da galabnimo

Dadka goobta degan ee u baahan macluumaad dheeraad ah ha la xiriiraan xafiiska guriyeynta ee deegaankooda:

☎ 1300 598 521

✉ richmond.housing@dffh.vic.gov.au



Mararka qaar ogolaanshaha golaha ayaa loo baahan yahay si looga shaqeeyo wixii ka baxsan saacadahan balse waan la socodsiiin doonaa dadka goobta degan haddii ay taasi dhacdo.

Jadwalka shaqo ee dhismaha inta aan la burburin

139 Highett Street iyo meelaha kor loogu soconayo ee Elizabeth Street iyo Williams iyo Anderson Courts

Halkan ayaan joognaa

1. Barashada wax badan iyo ka dhigida wax kasta ammaan

- ✓ Sugidda guryaha bannaan
- ✓ Kormeerista goobta iyo dhismayaasha si qalabka loogu maareeyo si amaan ah
- ✓ Joogtaynta dayactirka joogtada ah

Bartamaha-2026

2. Diyaargarowga

- Diyaarinayo goobta iyo calaamadaha wax haga/tilmaamaya si loo sugo ammaanka goobta
- Hubinta isku xirka adeegga
- Meesha laga galo in laga dhigo mid badbaado u ah dadka lugaynaya, baabuurta iyo baarkinka baabuurka
- Shaqada laga qabanayo dhismayaasha gudahooda si ay ammaan u ahaadaan isla markaasna loo diyaariyo in la burburiyo

2026

3. Duminta

- Rakibaadda biraha wax lagu dhisayo (scaffolding)
- Waxa gudaha ku dhisan in lasoo saaro
- Dhismaha marka si taxadar leh oo tartiib-tartiib ah loo burburinayo
- Si joogto ah in bulshada loola socodsiiyo wixii soo cusboonaada



Wixii macluumaad dheeraad ah oo ay ku jiraan macluumaad ku qoran luqadaada booqo: homes.vic.gov.au/information-in-your-language

Wixii su'aalo guud ah iimayl u dir:

✉ enquiries@homes.vic.gov.au



Noofeembar/Diseembar 2025

Howlaha shaqo iyo xafladaha soo socda ee ka qabsoomi doona Richmond

Dhamaan shaqooyinka la qabanayo waxaa loo fulin doonaa heerarka ugu sarreeya ee amniga iyo shuruudaha sharciga.